Iimaanku wuu ku duugoobaa Uurkiina sida ay u duugowdo Marada cusubi, Ilaahay waydiista inuu Iimaanka ku cusboonaysiiyo Qalbigiina

Cabdullahi Binu Camar Binu Caas Allaha ka raali noqdo asaga iyo aabihiye waxaa laga wariyey inuu yiri: Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: Iimaanku wuu ku duugoobaa Uurkiina sida ay u duugowdo Marada cusubi, Ilaahay waydiista inuu Iimaanka ku cusboonaysiiyo Qalbigiina.

[Xadiis Saxiix ah] [Waxaa wariyay Alxaakim iyo Ad-dabaraani]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in Iimaanku ku duugoobo Qalbiga Muslimka, wuxuu u duugoobaa sida Marada cusubi ugu duugawdo isticmaalka dheer. Taas waxaa u sababa cibaadada laga gaabiyo ama in macaasi lagu dhaco iyo Naftu waxay jeceshahay in la muquurto. Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay inaan Ilaahay ka barino inuu Iimaankeena inoo cusboonaysiiyo, inago gudanayna waajibaadka lana imaanayna dikri badan iyo istiqfaarta.

http://sunnah.global/hadeeth/so/show/65020